**DEPARTMENT OF DEVELOPMENTAL SERVICES (WAAXDA ADEEGYADA KOBOCA)**
**THE AUTISM DIVISION (QAYBTA OTISMKA)**
**1000 Washington Street | Boston, MA 02118**

## FARIIN KU SOCOTO QOYSASKA LEH ILMAHA LEH XANUUNKA OTISMKA

# Fariin Muhiim ah oo ku socoto Qoysaska Massachusetts Oo leh Ilmaha Da'dooda ka Yar 9 sano Oo lagu Sheegay Xanuunka Otismka

### Xiliga Codsiga Furan Oktoobar 15, 2021 ilaa Oktoobar 30, 2021

Qaybta Otismka ee Waaxda Adeegyada Koboca ama loo yaqaano Autism Division of the Department of Developmental Services (DDS) ayaa wado Barnaamij Tanaasulka Otismka ee bixiyo ka dhexgalyo toos ah logu tala galay in logu kaalmeeyo ilmaha qabo xanuunka otismka oo muujiyo dhibaatooyinka daran ee dabeecadeed, bulshadeed iyo isgaarsiineed iyagoo istacmaalayo adeega loo yaqaano **Waxbarashada Awoodsiinta la Balaariyay** (adeegyada iyo taageeraha guriga dhexdiisa oo heerka sare). Adeegan ayaa ka dhaco guriga cunuga ama bay'adaha kale dabiiciga ah iyagoo ku hoos jiraan kormeeraha shaqaalaha isbitaalka tababaran oo na la heli karaa ilaa saddex sano. Barnaamijka ayaa sidoo kale u bixiyo adeegyo taageero oo la xiriiro sida hawlaha ka mid noqoshada bulshada iyo nasashada. Markay lasoo dhameeyo saddex sano ee adeegyada heerka sare, cunuga ayaa heli karo adeegyo dheeraad ah ee buuxinaayo baahida cunuga oo na uga kaalmeeynaayo ka gudubka Barnaamijka Tanaasulka Heerka Sare ee Otismka ilaa laga gaaro taarikhda dhalashada 9aad ee cunuga.

<u>**U Qalmitaanka**</u>: Shuruudaha xiga ayaa muhiim u ah ka qaybgalka barnaamijkan tanaasulka:

2. Cunuga waa in **hab la xaqiijiyay logu aqoonsaday** Xanuunka Nooca Otismka, taasoo ay hubin doonto Waaxda Adeegyada Koboca.

3. Cunuga inuu wali gaarin da'da 9 sano. Dhalashada ilaa ay ka gaarayaan 8 sano ayee ilmaha ka qayb qaadan karaan.

4. Cuniga waa inuu yahay qof degan Massachusetts.

5. Cunuga waa inuu buuxinaayo heerka daryeel logu baahanaayo adeegyada taasi na logu qabanaayo Xaruunta Daryeelka Dhexdhexaad logu talagalay dadka qabo Laxaad la'aanta Garaadka (ICF/ID) sida ay qiimeyso WAAXDA ADEEGA KOBOCA.

6. Qoyska waa inuu go'aansado inuu cunuga ku helo adeegyada guriga iyo bulshada dhexdeeda.

7. Cunuga waa inuu si nabad geliyo leh logu adeegi karo bulshada dhexdeeda.

8. Cunuga waa inuu leeyahay qof masuul oo sharciyan matalo oo awoodo inuu hogaamiyo adeegyada iyo taageeraha Tanaasulka.

1. Cunuga waa inay xaqoojiso wakaalada MassHealth inuu u qalmo caymiska MassHealth Standard (Caadiga) coverage, taasoo ku salaysan dakhliga qoyska. **Qoysaska oo wali aan buuxinin codsiga MassHealth, tani ayaa loo baahan yahay in la sameeyo xiliga buuxinta Foomka Codsiga Barnaamijka Tanaasulka.** (Talaabooyinka oo ka faaloonaayo habka loo buuxiyo codsiga MassHealth ayaa ku yaalo bogga xiga)

Barnaamijka Tanaasulka Otismka ayaa leh boosas xafidan (ilaa 30 boos gobolka dhan) ee logu talagalay ilmaha da'da 3 oo ka gudbaayo Ka Dhex Galka Hore. Ilmaha oo buuxiyo shuruudaha u xaq yeelashada barnaamijka ayaa logu adeegi karaa ilaa ay ka gaaraan 9 sano. Dhamaan adeegyada tanaasulka ayaa u baahan inuu cunuga wali buuxiyo shuruudaha u xaq yeelashada dhaqaaleed iyo caafimaadeed ee Barnaamijka Tanaasulka inta ay qaybta ka yihiin.

Iyadoo fursadaha Barnaamijka Otismka hadda ku dhaw yihiin inay buuxaan, waxaa marwalba jiro ilmo oo ka baxo barnaamijka maadaamo ay gaareen 9 sano ama sababo kale awgeed. Taasi darteeda, waxaanu dooneynaa inay dadka codsi soo buuxiyaan si ay u helaan markay boosaskan ka banaanaadaan Barnaamijka. Qaybta Otismka ayaa bixinaayo fursad logu buuxsado codsiga hadda socdo inta lagu jiro xiliga uu furan yahay codsiga. Qaybta Otismka ayaa markii ugu dambeysay ay furtay codsiga ahayd Oktoobar 2020.

**Xiliga Codsiga Furan Yahay ee 2021 ayaa socdo Oktoobar 15 - Oktoobar 30, 2021. Fadlan hubi inaad kusoo dirtid BOOSTADA ama IIMAYLKA *Codsiga Furan* xiliga u dhexeeyo Oktoobar 15 iyo Oktoobar 30. Qaybta Otismka ayaa daneyn doonin wixi xiligaa ka baxsan lasoo diro. Hadii aad dirtay codsi xiligii lasoo dhaafay ee codsiga furnaa ee Oktoobar 2020, WAA INAAD CODSI U SOO DIRSATID 2021.**

**Habka loga Qayb Qaato Hawlgalka Codsiga Furan:**

**1. Hel koobiga *Codsiga Furan***

a. Fadlan la xiriir Xaruunta degaankaada ee Taageerka Otismka (ku lifaaqsan) si aad uga codsatid *Codsiga Furan*.
b. Xaruunada Taageeraha Otismka ayaa u furan inay kaaga kaalmeeyaan dhamaystirka codsiga.
c. Dhamaan foomyada ayaa logu soo daabacaa bogga DDS www.mass.gov/DDS ‘Adeegyada Tanaasulka Otismka DDS” hoosteeda

**2. Buuxi *Codsiga Furan*. Waxaad u baahan:**

a. taariikhda dhalashada cunugaaga
b. lambarka nabadgeliyada bulshadeed ee cunugaaga
c. lambarka aqoonsiga MassHealth ee cunugaaga

**3. Gudbi *Codsiga Furan*:**

a. Codsiyada waa inay leeyihiin Calaamad Boosto ama Shaabad Taariikh leh oo u dhexeyso Oktoobar 16, 2020 iyo Oktoobar 31, 2020.
b. Codsiyada la gudbiyo xiligan gaarka loo sheegay dibadiisa ayaan la qiimeyn doonin.
c. Ku buuxi codsiga qalin si fiican na u daabac.
d. Ku saxiix codsiga qalin.
e. CUNUG WALBA HAL CODSI OO KELI AH WAA IN LOO SAMEEYO—Qaybta Otismka ayaa daneyn doonin codsiyada halka ka badan

**4. Qaybta Otismka ayaan AQBALAYNIN codsiyada gacanta lagusoo gudbiyo, codsiyada waa in lagusoo diro:**

**Department of Developmental Services**
**Autism Division**
**Att. Autism Program Application Form**
**1000 Washington Street, Boston, MA 02118**

Qaybta Otismka ee DDS ayaa mudnaasha siinayso inay xaqiijiso in hawsha codsiga ka qaybgalka Barnaamijka Tanaasulka ay si buuxdo u heli karaan qoysaska iyo ilmaha leh otismka oo ka yimaado asalada luuqada iyo dhaqamada kala duwan. Wargelinta ayaa lagu heli karaa Afcarabiga, Burmese, Chinese (Mandarin & Cantonese), Haitian Creole, Cape Verdean Creole, Portuguese (Yurubta), Isbaanishka, Khmer, Vietnamese, Nepali iyo Afsoomali

**Fasiraada iyo turjumaada ayaa si bilaasha logu heli karaa dhamaan ka qaybgaleyaasha.**

**Habka loo Codsado MassHealth:** Waxaad ku codsan kartaa MassHealth mid ka mid ah hababkan xiga:

- Hadii aad leedahay akoon, gal mahealthconnector.org ka dib na halkaasi ka codso MassHealth
- Hadii aad lahayn akoon, habka ugu dhaksaha badan ayaa ah inaad codsi ka samayso internetka ka dib na ka hagaajisatid akoon nabadgeliyo leh oo online ah mahealthconnector.org.
- Buuxi oo na saxiix Codsiga Caymiska Caafimaadka iyo Ilkaha iyo Caawinaada Xagga Bixitaanka Kharashka Massachusetts ka dib na u dir:

  **Health Insurance Processing Center**
  **P.O. Box 4405**
  **Taunton, MA 02780**
  **Ama Faks ugu dir 1-857-323-8300**

- Wac Xaruunta Adeega Macmiilka Xubinka ee MassHealth ee 1-800-841-2900 (TTY: 1-800- 497-4648 logu talagalay dadka Dhagoolka, sida fudud waxba ku maqlin, ama laxaad la'aanta hadalka) ama 1-877-MA ENROLL (877-623-6765).
- Booqo mid ka mid ah 4ta Xaruumaha Diiwangelinta ee MassHealth ama MassHealth Enrollment Centers (MEC) hoosta ku liis gareysan oo na si shakhsi ah ugu codso.

**Xaruunta Diiwaangelinta MassHealth – Chelsea**
45 Spruce Street Chelsea, MA 02150
#1-800-841-2900 TTY 1-888-665-9997

**Xaruunta Diiwaangelinta MassHealth -Springfield**
88 Industry Avenue, Suite D Springfield, MA 01104
#1-800-841-2900 TTY 1-888-665-99

**Xaruunta Diiwaangelinta MassHealth – Tewksbury**
367 East Street Tewksbury, MA 01876
#1-800-841-2900 TTY 1-888-665-9997

**Xaruunta Diiwaangelinta MassHealth - Taunton**
21 Spring Street, Suite 4 Taunton, MA 02780
#1-800-841-2900 TTY 1-888-665-9997

Si aad u heshid maclumaad dheeraad ah ee ku saabsan Barnaamijka Tanaasulka Otismka, la xiriir Xaruunta degaankaada ee Taageerka Otismka hoos ku yaalo ama iimayl u dir AutismDivision@mass.gov. Ama ka wac Qaybta Otismka ee DDS lambarkan 617-624-7778.

**Galbeedka Massachusetts**
**Pathlight: Autism Connections**
41 Russell Street
Hadley, MA 01035 | 413-585-8010

75 South Church Street, #402
Pittsfield, MA 01201 | 413-443-4780

220 Brookdale Drive
Springfield MA 01104 | 413-732-0531

**Dhexdexaadka Massachusetts**
**HMEA: Autism Resource Central**
712 Planation Street
Worcester, MA 01605 | 508-835-4278

**Metro Galbeedka Boston**
**Autism Alliance of MetroWest (AAMW)**
1881 Worcester Rd, # 100A
Framingham, MA 01701 | 508-652-9900

**Boston Balaaran**
**Vinfen**
950 Cambridge Street
Cambridge, MA|617-441-1800

**Gobolka Norfolk**
**The Arc of South Norfolk: The Family Autism Center**
789 Clapboardtree Street
Westwood, MA 02090 | 781-762-4001

**Koonfur Bari Massachusetts**
**Community Autism Resources (CAR)**
33 James Reynolds Road Unit C,
Swansea, MA 02777 | 800-588-9239 | 508-379-0371

120 Main Street 2nd Floor,
Bridgewater, MA 02324 | 508-807-4930

**Waqooyi Bari Massachusetts**
**Northeast ARC (NEARC) The Autism Support Center**
6 Southside Road
Danvers, MA 01923 | 978-777-9135

www.mass.gov/DDS-autism-waiver-services
Maclumaadka ayaa sidoo kale lagu heli karaa:

Carabiga, Burmese, Chinese (Mandarin & Cantonese), Haitian Creole, Cape Verdean Creole, Portuguese (Yurubka), Isbaanishka, Khmer, Vietnamese, Nepali iyo Afsoomali